# Golaha Wakiiladda

## WAAXDA SHURUUCDA, HADAL-QORAALKA IYO FADHIYADA

**Kal-fadhigii 45aad fadhigii 19aad**

***Isniin, 05 April 2021***

**Quraanka: -** Xil. Xaamud Cisman

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada Xeer Lr. 14

**Md. Xasan Xuseen Codyare** ***(3min 01sec)*****:-** Gudoomiyaha Golaha, Mudanayaasha Sharafta leh, Xoghaynta Golaha iyo Saxaafada dhamaantiin ASC, Xeerkan dee horta baahi baa keentay oo arrinta ugu muhiimsan wuxuu ahaa mar hadii deegaankii hore loo soo dhigay oo iminka doorashadii galayaan xisbiyadii wakhtigii ka dhamaanayaan maxay ku tartamayaan bay ahayd oo qodobka ugu mihiimsan ahaa, kaas in xal loo helo sax bay ahayd, laakiin xeerka waxaad moodaa meelo badan inuu iska horimanayo oo murug ku jiro, sababtoo ah Madaxweynaha wakhtiga uu ka dhamaanayo iyo xisbiyada qaranka ee jira wakhtiguu ka dhamaanayo bil baa u dhaxaysa oo xisbiyada bisha horeeya, hadana Xeerku wuxuu leeyahay Doorashada Madaxtooyada waa inay lix bilood ka dambeeyaan Xisbiyaadu, halkaa murug baa ku jira oo dib in loo eego weeye.

Tan kale, Xeerku qodobadiisa wuxuu taabanayaa qodob lama taabtaana, Xisbiyadu golayaal bay leeyihiin baarlamaan oo ka badan baarlamaankeenan, waxay go'aansanayaan iyo xeer-hoosaadyadoo maaha in xisbiyada la mideeyo, Xeerku halkan wuxuu leeyahay xeerarkooda iyo qaabka maamulka xisbiyada waa in la mideeyaa oo ku qoran Xeerkan, arrintaas lama mideyn karo waa waxyaabaha ay ku tartamayaan ee ku kala badinayaan, marka Xisbiyada ha loo daayo Xeerarkooda oo ha ku ekaadaan waxaana ansixiyay golayaashooda oo arrinkaasi waa lama taabtaan ee ha loo daayo.

Arrinta kale ee aan durayaa waxa weeye **Gudidda Diiwaangalinta ee la kala qaybiyay** Shir-gudoonka Golaha Wakiiladu wuxu qaatay laba Xubnood, ururada Bulshadu laba Xubnood, Madaxweynuhuna laba xubnood iyo xubin Garyaqaana, anigu halka waxaan leeyahay laba Xubnood in Baarlamaanku qaato maaha waa in meel kale loo badalaa labadaas xubnood oo ay soo magacaabaan.

Gudiddan Diiwaangalinta mudo dheerna way joogeen wayna ansaxsan yihiin, marka waxaan leeyahay in la badalo looma baahnee iyaguun dib ha loo habeeyo, anigu intaas ayaan kaga baxayaa. WSC.

**Md. Aadan X. Diiriye Dirir (*19min 10sec*):-** Bismilaahi, Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Shaqaalaha waxaan idinku Salaamayaa ASC, Xeerkan maanta ina horyaala ee Xeer Lr. 14 waxaynu gudanaynaa qodobka 9a[ad] ee Dastuurka ee tilmaamaya Xisbiyada Qaranku in aanay ka badan karin saddex Xisbi, Faqradiisa [3aad] sheegayo habka xisbiyadu u sameysmayaan in Xeer qeexayo, Xeerkiina waa kaas maanta aynu gacanta ku hayno.

**Qodobka 111[aad]** ee Dastuurku isna wuxuu cadeynayaa golayaasha deegaanku inay ku imanayaan doorasho mudadooduna tahay 5 sannadood, waxa kale oo uu cadeynayaa oo aan meel kale ku qornayn wax la yidhaahdo mudo kordhin, laakiin waxa ku taalla in la kala diri karo golayaasha deegaanka, Golayaasha Deegaanka maanta inoo sameysani waxa uu ku fadhiyo xeerna kuma cada dastuurna kuma cadda, dayacayaasi waxa keenay Golahan Xeer-dejinta oo maanta wakhtigiisii dhamaaday.

Hadii aan u soo gudbno Xeerkan iminka ina horyaala iyo wax ka badalkiisa, anigu waxaan soo jeedinayaa inay ku muuqato **Qodobka [1aad] Erey-bixinta Xeerka Farqadiisa 4[aad] "Urur Siyaasadeed"** macnaha ay Xeerka ugu taalo iyo wax ka badalka Gudiddu soo jeedisay in la is waafajiyo oo Xeerka iminka inaga soo bixi doona uu noqdo mid is waafajisan.

**Isla Qodobka 1[aad]** ee Erey-bixinta Wax ka badalka Gudiddu soo jeedisay waa in la raaciyo wax loola jeedo ereyga **"Doorasho toos ah"** oo macneheeda lagu muujiyo erey-bixinta Xeerka ayaa muhiima.

Wax ka badalka Gudidda hadaan eego, waxaan ayidayaa oo ku raacsanahay sida ay u soo dhiseen **Qodobka 3aad** ee Gudidda Diiwaangalinta Ururada Siyaasadda iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka, waxa kaliya oo aan kaga duwanahay Gudidda meelaha ay ka imanayaan, waxaana soo jeedinayaa in loo daayo Madaxweynaha oo uu soo magacaabo 7da xubnood taas oo Wax ka badalka Gudiddu u kala qaybisay dhowr meelood inay soo xulaan, waxaanse ku raacsanahay Gudidda inay Xubin haween ah ay ka midnoqoto.

Qodobka cusub ee Gudiddu soo jeedisay in laga dhigo **Mudadda ruqsada Xisbiyada Farqadiisa 3a[ad]** oo u dhigan **"Xisbiyada ay dhammaatay muddda ruqsadda la siiyay, ma geli karaan doorashada madaxtooyada, Wakiillada iyo Deeganka, waxayna ahaanayaan xisbiyo ku meel-gaadh ah ilaa intaa laga qabanayo doorasho toos ah oo ay ku soo baxayaan xisbiyo Qaran"** Xisbiyada waxaynu siinay wax la yidhaahdo shakhsiyad qaanuuni ah "Legal personality" sida Xeerka Qodobkiisa 27aad ku cadayd,

marka mudadaas ku meel gaadhka ah ee ruqsadii ka dhacsan tahay ma yeelanayaa shakhsiyad qaanuuniga ah? Marka waa in halka la cadeeyo. **Lacagta 300,000,000 ah** waan ku waafaqay soo jeedinta Gudidda.

**Qodobka 7aad ee Waxyaabaha ka reeban Xisbiga** oo Wax ka badalka Gudiddu ku sameysay, waxaan leeyahay Xisbi waliba wuxuu leeyahay Xeer-hoosaad, xisbiyada Xeer-hoosaadadooda iyo siday wax u sameysanayaan yaan lagu faragalin baan soo jeedinayaa. Waxa kale oo aan soo jeedinayaa halka Gudiddu ka tidhi waxa goob joog ka noqnaya marka xisbigu wax sameysanayo Xeer-ilaalinta, maaha inay goob joog ka noqdaan xeer-ilaalintu marka xisbigu wax sameysanayo waana xaq daro, ma dambi bay galeen, taasna meesha ha laga saaro.

**Qodobka 9aad Farqada 4aad Xarafka (T)** waxaan leeyahay waxa lagu diiday waa in la sababeeyo oo xisbigu sababeeyaa, maaha wuu diiday uun in la iska qoro.

**Qodobka 10aad Farqadiisa 7aad** go'aanku waa kee? Ma ka hore ee ku cad **Farqada 4aad** baa mise waa go'aanka **Farqada 6aad xarafka (C)** ku cad, labadaas kan uu yahay waa inay kala cadaato oo lagu cadeeyo farqadan kan loo jeedo.

**Qodobka 16aad Faqradiisa 6aad** waa in la raaciyo Madaxweyne ku-xigeenka, waxaana soo jeedinayaa in Xeer-hoosaadka xisbiga loo daayo hal mudo xileed iyo laba kay doonaan ha uga dhigaane, waa waxyaabaha aan lahaa yaan xisbiyada lagu faro-galin ee xeer-hoosaadydooda ha loo daayo.

Xisbiyada ama Ururada aynu sameyno maxay ruqsada ku waayi karaan oo xisbinimada iyo ururnimada sameysan maxaa lagu waayi karaa? Qodobkaas oo dhan wuu ka maqan yahay Xeerka, marka waxa inaga baxayaa waxa fiican inay miisaanaadaan oo si wacan loo eego, ururada iyo xisbiyada inoo sameysan ee la ansixiyay waxay ku waayi karaan qodob ah waa in Xeerka lagu daro ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobada 23aad iyo 27aad** ee Xeerkan waxa iyana ku dhacaya isbadal, Qodobka 27aad wuxuu noqon doonaa **Xeer Lr. 14/2021** halka uu iminka ka yahay Xeer Lr. 14/2011

**Marwo. Baar Siciid Faarax** ***(5min 26sec)*****:-** Bismilaahi Raxmani Raxiim, Dhamaan goob-joogayaasha Golaha iyo Saxaafada ASC, bacda salaam, Gudoomiye Xeerkani waa xeerkii lagu qaban jiray Ururada, marka xeerkii oo doorashadii ururada aan la qaban iyo xeerkii

oo la garab wado waa arrin aan la fahmi karin xaqiiqdii waxa loola jeedo waayo doorashadii Golayaasha Deegaanka oo in badan la sugayo walina aan la qaban sababta la isugu qaban waayay inta la is-garab wado dee ma garanayno wax looga dan leeyahay.

Waxa halkan wax ka badalka ku qoran lacag 3 boqol oo milyan ah waxa loola jeeda cidda miisaaniyada dalka haysa ama cidda ku tiirsan Dahab-shiil iyo Telesom inay isa soo sharaxi karto dad badan baa xuquuqdoodii laga qaadayaaa, **waxaan soo jeedinayaa in 150 hore laga dhigo 100 milyan, 3dan boqolna meesha laga saaro.**

Waxa kale oo halkan ku qoran looma adeegsan karo hanti dibada am cid Somaliland ka baxsan ka timi, hadii xisbi xaakinku lacag ka soo qaato dawlaha aynu jaarka nahay oo ololaha iyo doorashada ku galo kuwa kale la yidhaahdo looma ogola, yaa xisbi xaakimka ka masuul ah in aanu lacagta dawladahaas ka timaada ololaha ku galin sida Imaaraadka iyo Djabuuti, Waxaan soo jeedinayaa in Qodobkas run laga dhigo oo xisbi xaakimkuna ku galin deeqa dawlaha ololaha.

Qodobkale ayaa isna wuxuu leeyahay Hantida dawlada laguma gali karo ololaha, waxaan maalin dhoweyd arkayay nin musharax ah oo Wasiir la socdaan oo Riigii dawladu la socdo oo la leeyahay ceelal baa loo qodayaa, riigu waa kii dawlada kuwa ololeynayaa Wasiiradii, isna waa Musharax iska casiley wasiir, waxaynu qoraneyno iyo waxaynu ku dhaqmeyno Gudoomiye dee in la iswaafajiyo baa fiican, waxaanu raacsanahay in aan hantida dawlada aan lagu ololeyn, laakiin maantaba iyadoon bilaabin baa lagu ololeynaya, taasna waa in wax laga qabta.

Lixdan bilood ee doorashada ka hor la leeyahayna ha la diiwaangaliyo ururada, waxay ila tahay xisbigu xaq buu u leeyahay inuu 10kiisa sanno dhameysto, wakhtiga uu dhameystona olaha inuu galo xaq buu leeyahya, marka waxaan soo jeedinayaa in xisbigu 10kiisa sanno xor u yahay oo ee aan mudo laga soo qadimin.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa, Xisbiyadu qaab-dhismeedb ay leeyihiin, xisbi walibana siduu wax u dhisanayo isagaa u madax-banaan, xeer-hoosaad bay leeyihiin sida Goleheenu xeer-hoosaad u leeyahay, marka waa in qodobkaasna meesha laga saaro la leeyahay xisbiyadu qaabkaas ha u dhismeen iyo waxaas, kaasina waa khalad, waa farogalin, waa in meesha laga saaro. Intaasaan ku soo koobayaa WSC.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** ***(41min 03sec):-*** Bismilahi Raxmaani Ramiin. Guddoomiyaha, Xildibaanada, Shaqaalaha iyo saxaafada waxaan idinku salaamayaa. Asalaamu Calakum Warax Matulahi Wa barakaatu.

**Qodobka 1aad: Magac Xeerka** Magac Xeerka ee Guddida soo jeedisay inuu noqdo "Wax-ka-beddelka iyo Kaabis Xeerka ururada iyo Asxaabta Siyaasada Xeer Lr. 14/2001"

**Waxaan soo jeedin lahaa inuu noqdo:** "Xeerka Nidaamka Ururada iyo Asxaabta Siyaasada Xeer Lr. 14/2001"

**Erey Bixinta:** Waxaan soo jeediyey inay noqoto Qqodobka 2aad. **Ereyga "Xubin"** waxaan soo jeedin lahaa in loo qeexo sidan. **Xubin** "Xubin waxa loola jeedaa xubin ka mid ah Hogaanka Xisbiga, Guddida Fulinta, Golaha Dhexe ama Xisbi Weynaha"

**Ereyga "Hogaan "**waxaan soo jeedin lahaa in loo qeexo sidan: "Hogaan waxa loola jeedaa Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenada, Xoghayah Guud iyo Xubnaha kale ee datsuurka Xisbigu tilmaamayo".

Qodobka u jeedooyinka xeerka ee soo jeedinta Guddida, waxaan soo jeedinayaa in farqada 1aad loo qoro sidan; **In la helo xeer loo raaco hanaanka furashada diwaangelinta ururada siyaasada iyo u tartamidda ururada siyaasadda ee la diwaangeliyey iyo Xisbiyada jirey ka mid noqoshada tirada Xisbiyada Qaran ee Dastuurku xaddiday 10-ka sannadood ee soo socda.**

**Qodobka xarunta Dhexe ee jeedinta Guddida ee uu dhigan sidan.**"Xarunta dhexe ee Guddida waxay noqonaysaa Magaalo-Madaxda waxayna ku yeelanaysaa Wakiilo Gobol doorasho dalka"

Waxaan soo jeedinayaa in ereyga "**yeelanayaan"** loo beddelo **"yeelan karaan" Qodobka** Muddada xil haynta Guddida ee soo jeedinta Guddida, **farqada 2aad** ee u dhigan sidan:

"2. Xubinta Guddida ah ee mutaysata waxa dib loo magacaabi mar labaad oo qudha"

Qodobka Magacaabidda xubnaha soo jeedinta Guddida.

Kol haddii uu Madaxweynuhu Magacaabayo laba xubnood oo Guddida ah **(Sida ku qoran xarafka "A" ee Farqada 1aad).**

**Waa in xarafka "B" ee farqada 1aad loo qoraa sidan** "laba xubnood oo ay soo xulaa Xisbiyada mucaaridka ahi".

**Sababayn**

1. Goluhu mar hadduu leeyahay ansixinta xubnaha Guddida, waa khalad in magacaabistooda wax ku yeesho.
2. Madaxweynuhu Xisbi ayuu ka tirsan yahay, waa in Madaxda xisbiyadda kalena la xaq-siiyaa oo la isu dheeli-tiraa Awoodda ay Xisbiyaddu ku leeyihiin Magacaabidda Guddida muxaafid iyo mucaaridba.

Sababahaa dartood waa in **xarafka "B" ee farqada 1aad** loo qoraa sidaan kor ku xusay.

**Qodobka dhaarta Xubnaha Guddida ee farqada 2aad ha loo qoro sidan**:

**" WAXA IGU WALAAHI AH, OO IGU BILAAHI AH, IN AANAN KU JIRIN URUR SIYAASADDEED IYO XISBI QARAN TOONA, HORENA AANAN UGA MID NOQON, KANA MID NOQON DOONIN INTA AAN XILKA HAYO, UGUNA ADEEGAYO DAACADNIMO, CADDAALAD, SINNAAN IYO DHEX-DHEXAADNIMO URURADA SIYAASADDEED IYO XISBIYADA QARAN".**

**Qodobkan Muddada Ruqsada Xisbiyadda ee soo jeedinta Guddida ee farqada 2aad ee u dhigan sidan:**

"Ruqsadda ogolaanshaha Xisbigu/ururku waxa uu ku heli karaa ka qayb-galka doorashada toos ah, oo loo qabtay, ururada iyo asxaabta, isla markaana uu si rasmi ah uga mid noqday saddexda xisbi si xeerka waafaqsan"

**Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan** "2. Xisbi ay ka dhacday shahaadaddii xisbinimo siyaasadeed ama urur wuxuu ku heli karaa shahaadad xisbinimo Qaran am aka qayb-galka doorasho toos ah oo loo qabtay xisbiyadda shahaadddu ka dhacayso iyo ururada siyaasadeed ee loo diwaangeliyey si xeerka waafaqsan ee natiijada doorashadaa kaga mid noqda saddexda tartame ee hela codadka ugu badan".

**Farqada 3aad ee Qodobkan muddada Ruqsadda Xisbiyadda ee soo jeedinta Guddida ee u dhigan sidan:**

**"3.** Xisbiyada ay ka dhammaatay Muddada ruqsadda la siiyey, ma geli karaan doorashada Madaxtooyada, Wakiilada iyo deegaanka, waxaanay ahaanayaan xisbiyo ku meel-gaadh ah ilaa inta laga qabanayo doorasho toos ah oo ay ku soo baxaan Xisbiyo Qaran".

Waxaan soo jeedinayaa in farqaddan 3aad laga saaro xeerka sababahan soo socda dartood:

1. In Xisbi Qaran noqdo xisbi ku meel-gaadh ah qayb ka mid ah muddadii uu ruqsadda u haystay xisbinimada waa iska hor-imaad sharci. 10 sannadood ayuu xisbi haystaa ruqsadda xisbnimo, macnaheedu waa 10 sannadood ee ma aha 9 sannadood iyo 6 bilood. Ilaa maalinta u dambaysa 10 sannadood Xisbi Qaran waa Xisbi Qaran.

2. Farqadda 3aad ee Qodobkan waxay xalaalaynaysaa oo qiil cusub u samaynaysaa doorashooyin dib u dhaca oo loogu mar-marsoodo xisbiyo ruqsaddu ka dhacday.

3. Si aanay u iman xaaladda ku xusan farqadda 3aad waa in la dabaqaa oo la fuliyaa farqadda 4aad ee Qodobkan ee qeexaysa in 6 bilood ka hor dhammaadka muddada ruqsadda la qabto doorashadu loogu soo bixi lahaa xisbiyo Qaran. Sidaa darteed looma baahna farqadda 3aad ee muddada ruqsadda Xisbiyadda.

**Farqadda 4aad ee Qodabkan muddada ruqsadda Xisbiyadda ee u dhigan sidan;**

“4. Ururada cusub iyo xisbiyadda ka qayb-galaya doorashada toos ah, waa in diiwaan-gelintooda la qabtaa lix bilood ka hor dhammaadka muddada ruqsadda xisbiyadda”.

**Waxaan soo jeedinayaa farqadda 4aad ee Qodabkan muddada ruqsadda Xisbiyadda loo qoro sidan;**

**“4.** Furashada, diiwaan-gelinta, qiimaynta iyo ruqsadda siinta ururrada siyaasadda ee cusub waxa la bilaabayaa ka hor dhammaadka muddada shahaadadda Xisbiyadda, doorashada toos ah ee ururradda siyaasadeed ee qaatay ruqsaddaha ururo siyaasadeed xisbiyadda Qaran ugu tartamayaan ka mid noqoshada xsibiyadda Qaran ee dastuurku xaddiday waxa la qabanayaa 30 maalmood ka hor dhammaadka muddada shahaadadda Xisbiyadda”.

**Qodobka 6aad** ee Xeerkani ma waafaqsana wax-ka-beddelka Guddidu soo jeedisay ee farqadda 1aad iyo 5aad. Farqadda 1aad sideedii ha loo daayo, farqadda 5aad ee u dhigan sidan;

**“5.** Tobankii (10) sannadoodba mar baa la abuuri karaa urur siyaasadeed si waafaqsan xeerkan, hase yeeshee in urur siyaasadeedka la abuuraa lix (6) bilood ka hor maalinta doorashada Golayaasha deegaanka”.

Waxaan soo jeedinayaa ereyada **“ la abuuri karaa”** iyo “ la abuuraa” ee ku jira **farqadda 5aad ee Qodobkan 6aad** loo beddelo **“ la furan karaa” iyo “ la furaa”.**

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in **Qodobka 6aad lagu kordhiyo farqad 6aad** oo loo qoro sidan”

**Farqadda 6aad.** Xilliga furashada ururro siyaasadeed ku beeganta xilli aan la qabanayn doorasho gelayaal deegaan, ururrada siyaasadeed iyo Xisbiyo Qaran waxay ku tartamayaan barnaamijyadooda siyaasadeed, waxaana loogu codaynayaa magacyadood iyo astamooda Xisbi/urur”.

**Qodobka 7aad** waxyaabaha ka reeban Xisbiyada/Ururada, farqadda 6aad ee ay Guddidu soo jeedisay in lagu kordhiyo Qodobka, waxaan soo jeedinayaa in lagu koobo intan:

“**Farqadda 6aad.** Xisbi/urur kasta waxa ka reeban in xubnaha Hogaanka Xisbiga/ururka loo doorto si aan daah-furnayn oo duuduub ah”.

Qodobka 10aad sababaha lagu waayi karo, xubinimada Xisbi/urur farqadda 1aad ee soo jeedinta Guddida ee u dhigan sidan:
Farqadda 1aad "ay ka qayb-qaadatio samaynta urur kale am aka qayb-qaata samaynta xisbi kale".

**Waxaan soo jeedinayaa in loo qoro sidan; Farqadda 1aad** "ay furato urur kale ama ay ka qayb-qaadato furashada urur kale ama hawlaha Xisbi/urur kale".

Waxa kale oo aan soo jeedin in **farqadda 5aad ee Qodobka 10aad** ee soo jeedinta Guddida xagga dambe laga raaciyo "iyo difaaca Xisbi/urur go'aankiisa laga cawday".

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in farqadda 7aad ee Qodobka 10aad ee soo jeedinta Guddida in loo dhigo sidan:

"7. Dhinac ku qanci waaya go'aanka Guddida, waxa u bannaan in uu cabasho u gudbisto maxkamadda sare Muddo 14 maalmood gudahood ah oo ka bilaamaysa maalinta Guddidu ku dhawaaqdo go'aankeeda, iyadoo xukunka Maxkmadda sare noqonayo kama dambays".

Qodobka 12aad- Muddada Musharaxa Madaxweynaha, ku xigeenka Madaxweynaha iyo Guddoomiyaha Xisbiga, Farqadda 2aad ee soo jeedinta Guddida ee u dhigan sidan:
"2. Qofna ma qaban karo xilka Guddoomiyaha Xisbi/Urur laba jeer wax ka badan, muddada xisbigaasi jiray".

**Waxaan soo jeedinayaa in farqadda 2aad lagu soo koobo intan:**

"2. Qofna ma qaban karo xilka Guddoomiyaha Xisbi/Urur laba jeer wax ka badan".

**Ereyga** "Muddadii Xisbigaasi jiray". Waxay u bannaanaysaa qofkaa labada jeer soo qabtay Guddoomiye xisbi in sida mid uu ururnimo ka soo bilaabo, sidaa darteed waa in farqadda intaa dambe laga tiro.

Qodobka 16aad- Hogaamiyayaasha Xisbi/urur siyaasadeed, farqadda 6aad ee soo jeedinta Guddida ee u dhigan sidan:

"**Farqadda 6aad "**Guddoomiyaha Xisbi ee loo doortay Madaxweynaha, wuxuu xilka Guddoomiyaha sii haynayaa hal muddo xileed oo kale".

**Waxaan soo jeedinayaa in farqadda 6aad loo qoro sidan: ""Farqadda 6aad "**Guddoomiyaha Xisbi ee loo doortay Madaxweynaha, wuxuu xilka Guddoomiyaha sii hayna karaa muddo xileedkiisa Madaxweynenimo ee koowaad".

Qodobka 19aad Hantida Xisbi/urur farqadda 6aad ee soo jeedinta Guddida ee u dhigan sidan: "farqadda 6aad Qoondada Miisaaniyadda ee ay xisbiyadu ka helaan dawladda, waxay ku bixinayaan ijaarka iyo hawl-wadeennada xafiisyadooda soo jeedinayaa in farqaddan 6aad loo qoro sidan"
"Farqadda 6aad Qoondada Miisaaniyadda ee ay xisbiyadu ka helaan dawladda, waxay ku bixinayaan kirooyinka xafiisyadooda xarunta dhexe, Gobollada iyo degmo doorashooyinka, iyo gunnooyinka hawl-wadeennadooda ka hawl-gala xafiisyadaas",

**Qodobka- habraaca Gannaaxa farqadda 2aad ee u dhigan sidan:** "2. Haddii ay xisbi ay ku caddaato xagjirnimo, cunsuriyad ama innuu baahinayo mabaa'dii ka dhan ah shareecada islaamka, Qaranimada Somaliland iyo wax kasta oo ka hor imanaya dastuurka Jamhuuridda Somaliland, waxay Guddida kala noqonaysaa ruqsadda".

**Waxaan soo jeedinayaa in farqadda 2aad loo qoro sidan: "**"2. Haddii ay xisbi lagu eedeeyo xagjirnimo, cunsuriyad ama innuu baahinayo mabaa'dii ka dhan ah shareecada islaamka, Qaranimada Somaliland iyo wax kasta oo ka hor imanaya dastuurka Jamhuuridda Somaliland, waxay Guddida dacwad uga furaysaa maxkamdda sare oo awood leh in haddii ay dembiyadaasi ku caddaadaan ay buriso shahaadaddii xisbino ee xisbigaas.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in ganaaxa ee u dhigan sidan: "farqadda 3aad; haddii xsibigu qabsan waayo shirweynihiisa ama shuirka Golaha dhexe, Guddida ayaa go'aan ka gaadhaysa si waafaqsan xeerkan, Guddidu waxay awood u leedahay in ay ganaaxaan ama ruqsadda kala noqdaan iyo in ay soo qiimeeyaan xaalada shirarka

**Waxaan soo jeedinayaa in farqadda 3aad loo qoro sidan**: "farqadda 3aad; haddii xsibigu qabsan waayo shirka Golaha dhexe ama shirweynihiisa xilliga uu waajibiyey xeerkani ama dastuurka xisbigu, shirka Golaha dhexe, Guddida ayaa soo baadhaysa sababta ay u qabsoomi waayeen, iyadoo haddii aanay jirin sababo lagu qanci karo oo shirarkaasi ku qabsoomi waayeen, ay Guddidu awood u leedahay in ay ganaax lacageed oo aan ka badnayn 50,000,000 SL.SH ( Konton milyan oo Sl Shillin ah) ku xukunto xisbiga isla markaana u qabato muddo macquul ah oo Xisbigu ku qabsado shirkiisa Golaha dhexe ama shirweynihiisa hadba ka baaqday".

**Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Xoog)** *(27min 12sec)*:**-** Bismilaahi, Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada, Shaqaalaha dhamaantiin ASC, Marka hore waxaan inna xasuusinayaa in wakhtigeenii gabo-gabo yahay, xeerarka in aynu ku jaangoyn mustqabalka ee aynaan ku jaangoyn xaalada marka muuqata oo qudha iyo duruuf gaar ah, sababtoo xeerarkani wuxuu noqonayaa xeer jiilalka dambe lagu dhaqo, waxa kale oo aan leeyahay siyaasadu saxiib joogto ah ma laha cimri tagayna ceeb laguma sagootiyo, xeerarkan aynu minid roortaynayno ee dabada ka riixayno mudo gaaban baa inoo hadhaye aynu ka fiirsano.

Hadaan gudo-galo Xeerka, Erey-bixinteeda ereygii ugu muhiimsanaa ee in lagu soo daro ahayd laguma soo darin Gudidda gaar ah wax ka badalkay soo diyaarisay, waxa loola jeedo Doorasho toos ah may xusin, doorasho toos ah, doorasho toos ah Xildhibaankii iga horeeyay Xuseen Caydiid baa micneeyay waa waxa loola jeeda doorashada markay yimaadaan duruufo ay ku qabsoomi waydo ama la hor-qabateeyo sida maanta oo kale habkii lagu dooran jiray ee Doorashada Golayaasha Deegaanka, waa in xisbiga lagu doorta, political program-kiisa, logadiisa, ashkhaasta hogaaminaysa waxaasa loola jeedaa doorasho toos ah inay ku soo daraan bay ahayd, waxaan soo jeedinayaa in iyadoo sidii xildhibaankii iga horeeyay sheegay ah loogu soo daro.

Xubin waxa loola jeedo waxa lagu soo koobay waxa loola jeedaa hogaanka iyo golaha dhexe, taageerayaashii faraha badnaa ee aan kaadha siin jirnay ee qaadhaanka bixiya ee shir-waynaha soo camera waa xubno shir-weyne, marka xubintaas shir-weyne waa in lagu soo daraa.

Halka Erey-bixinta la yidhi hogaanka xisbiyada waa Gudoomiyaha, ku-xigeenada iyo xoghayaha guud, arrinkaas anigu waxaan odhan lahaa inta way ka balaadhan tahay oo qaab-dhismeedka waxa loo raacaa xeerka xisbiga, anigu halkan waxaan u arkaa in lagu bartilmaameedsanayo xisbiyada mucaaradka ah oo ay u dhisan yihiin hogaan iyo jagooyin kale oo xeerka xisbigu u jideeyay, qaab-dhismeedkana xisbigu xeerkiisu ku dhigtaa, inagu waxaan soo jeedinayaa in aan la taaban halkaa oo xeerka xisbiga loo daayo hogaanka xisbiga.

Magaca Xeerka waxaan soo jeedinayaa in sidiisii hore loo daayo ee ahayd Xeerka Diiwaangalinta Ururada iyo ansixinta axsaabta. Ujeedda Xeerka halka la leeyahay *kala xulista* waxaan leeyahay **furashada** xisbiyada iyo diiwaangalintooda ha laga dhigo, halka *hogaankooda* ha laga saaro ayaan soo jeedinayaa waayo xeerka xisbiga ayaa loo daynayaa hogaanka, sidoo kale waxa ku qoran in lagu sameeyo Gudidda Diiwaangalinta, gudidii soo tan jirta yaa kala diray. Waxaan soo jeedinayaa in la kala diro horta.

Xarunta Dhexe ee Xisbiga halka ay ku yeelanayaa xafiisyo waa amare waa in laga dhigaa **ku yeelan karaan.**

Qodobka Mudadda Xil-haynta Gudidda, xildhibaankii iga horeeyay baan ku raacsanahay, halka ha lagu daro xubintii mutaysata baa dib loo dhaarin karaa, maaha dhamaantooda.

Xulista xubnaha, golaha wakiiladu ma wada yeelan karo ansixin iyo soo xulis ama magacaabid, soo jeedinta gudidda gaarka ah waxay golaha ka dhigtay xeer-ilaalinye, xeer-beegti iyo xukume, meelay xeerarka dalka kaga taal ma jirto in waxaba adigu sameyso, sidoo kale Gudidda Qareenada xubinta la siiyay maaha qareenadu hay'ad dawladeed waa urur bulsho, waana raacsanahay in ururada bulshada la siiyo laba xubnood, xubinta qareenadaa waxaan raacsanahay in la siiyo guurtida waayo habkani waa habkii lagu soo magacaabi jiray Komishanka Doorashooyinka, marka in guurtidu qof magacawdaa, laba qofna waa inay soo magacaabaan ururada bulshadu, laba xisbiyada mucaaradka, laba xubnood Madaxweynaha la siiyo waayo madaxweynuhu waa gudoomiye xisbi, marka anigu sidaas in loo qaybiyo ayaan soo jeedinaya.

Qodobka Dhaarta inta hore oo dhan waan ku raacsanahay, laakiin waa in lagu sii daraa "inuu cadaalad iyo sinaan ugu garnaqi doono ururada iyo xisbiyada"

Mudadda Xisbiyada, barigii wax laga badalay Xeerka ee 2011kii waxaanu ka dhignay shahaado halka ruqsad la leeyahay hada, meel kasta oo ruqsad ku qoran tahay in shahaado loo badalo ayaan soo jeedinayaa.

**Farqada 3aad** ee Qodobka Ruqsada xisbiayda, xisbiyadii oo ruqsad haysta ayuu ka dhigayaa ku meel-gaadh, halka muran buuq baa laga abuurayaa, anigu gabi ahaanba farqada 3aad waan ka saari lahaa qodobkaas waana soo jeedinayaa.

**Qodobka 6aad Farqadiisa 5aad** halka 10kii sano waxa la abuuri karaa urur siyaasadeed ha loo badalao "la furan karaa urur siyaasadeed" oo halkii abuuri karaa ha laga dhigo la furan karaa.

**Qodobka 7aad** Farqadan cusub ee lagu soo daray inta dambe ee dheeraadka ah ee hadal tira badan oo aan sharciga waafaqsanayn lagu soo qoray oo sheegaysa in goobta lagu soo dooranayo goob-joog noqdo xeer-ilaalintu, dee xisbigii maxkamad ma saarna oo xeer-ilaalintii kiis kuma soo oogin, in xeer-ilaaliyo joogna maaha ilayn maxkamad maahee, sidoo kale macquul maaha in intaas oo qof mid mid gacanta loogu taago oo loogu codeeyo, markaa anigu qaybta hore uun baa daynlahaa oo ah ***"Xisbi/urur kasta waxaa ka reebban in Hoggaanka Xisbiga/Ururka, Guddiisa fulinta iyo Golaha Dhexe loo doorto si aan daah-furnayn oo duuduub ah"*** waxa weeye liiskii oo daah-furan hal mar gacanta loo taago laakiin qof qof macquul maaha, xeer-ilaaliyahana meeshu maxkamad maahee waa in laga saaro intaas.

Qodobka xuquuqda muwaadinka, waxaan u malaynayaa inay ujeedaan muwaadin kasta oo buuxiyay shuruudaha xeerkan, typing error uun baan saxay.

**Qodobka 10aad** ee Sababaha lagu waayi karo xisbinimada, **Farqada 1aad** waxaan ku sixi lahaa oo ka dhigi lahaa *"inay furato urur/xisbi kale ama ka qayb-qaadato furashada urur/xisbi kale"*Farqada 5aad qofkii cabanayay oo kaliya la yidhi ha ha u tago gudidda, marka waxay ahayd qofka cabanaya iyo kan laga cabanayo inay u tagaan si gudiddu ugu garnaqdo oo aan laga dhigin oo kaliya kii cabanayay inuu gudidda u tago. Marka waa in laga dhiga "waa in la dhageysta cabashada qofka cabanaya iyo qofka laga soo cawday"

Isla **Qodobkaas 10aad Farqada 7aad** ee Gudiddu ku soo dartay, wixii arrin maamul ka cabanaya maxkamada maamulka (administrative court) baa la geeyaa, arrinkanina waa arrin maamul, aniguna waxaan odhan lahaa go'aan gudidda fulinta riday hadii gudida ururadu ku raacdo ha noqdo final go'aankaasi, sidaas ayaan odhan lahaa.

**Qodobka 16aad Farqada 6aad** halka ah *"sii haynayaa"* waxaan ka dhigay "**sii hayn karaa"**

**Qayta 6aad Qodobka Warbaahinta iyo Hantida Xisbi/urur siyaasadeed, farqada 1aad** ee gudiddu badashay sabab ay badaleen ma garanayo iyo waxay ku soo kordhiyeen ilo-warbaahineed bay ka dhigeen halkiii ahayd "warbaahin u gaar ah" waxay ka dhigayaan warbaahintii madaxa-banaanayd ee cashuurta laga qaadayay, **marka waxaan soo jeedinayaa farqadaas in sidii hore loo daayo.**

**Qodobka 19aad** hantida xisbiga, waxay yidhaahdeen hanti-dhowraha ayaa galaya xisbiyda, xisbiyada dadkooda contribution siiya, hanti-dhowruhu banigagaba ma galee, arrinkaas anigu waxaan odhan lahaa ha laga saaro mana ah in hanti-dhowruhu faragaliyo lacagta xisbiyada wuuna ku dawakhayaa.

Farqada 6aad ee Qoondada miisaaniyada ee xisbiyadu ka helaan dawlada waxay ku bixin karaan, waxaan ku raacsanahay sidii Xildhibaankii iga horeeyay, xafiisku meeshu doono ha ka furnaado hawl-wadeenaduna kay doonaan ha joogeen dhamaan waa lag bixin karaa baan taageersanahahy.

Qodobka hab-raaca ganaaxa **farqada 2aad**, Sidaan sheegnayna Gudidda Ururadu waxay leedahay awood maamul, wax garsoor iyo cadaalad ku saabsan iyaga shaqadooda maaha, marka farqadaas ah hadii xisbi ay ku cadaato xag-jirnimo ama cunsiriyad ama inuu baahinayo, wali laguma cadayn, maxkamadna lama gayn, waa eedayn wayn, Maxkamad sare uun baa ka garnaqda tan oo kale, Gudiddu awoodas garsoor iyo maxkamadeed ma laha, marka waa in laga dhiga "hadii gudiddu ku tuhunto inuu dambiyadaas xisbigu ku jiro waa in xeer-ilaaliyaha guud u gudbisaa si uu Maxkamad u geeyo kiiskaas.

Farqada 3aad ee Qodobkaas hab-raaca ganaaxayada, hadii xisbigu ku qabsan waayo shir-waynihiisa, halka waxba ka maqan oo mudadii baa ka maqan marka hore, gudiddu ganaax way sameyn kartaa, markaad qof ganaaxaysona waa digniino ka horeyaan,

laakiin ruqsad kala noqosho maxkamad uun baa kala noqon karta, iyaguna malaha awoodaas ruqsad ma laha.

Waxa kale oo halkan ku qoran ganaaxa oo Gudiddu ay shan laab ka dhigtay, markii hore sodon milyan buu ahaa, iminkana boqol iyo konton milyan bay ka dhigtay gudidu, macquul maaha in 5 jeer laban-laab la kordhiyo, waxaana soo jeedinayaa in laba lagu dhufto oo lixdan milyan laga dhigo intaasina waa is-badalkii sixir bararku keenay. Intaas ayaan kaga baxayaa. WSC>

# Kal-fadhigii 45aad fadhigii 20aad

***Salaasa, 06 April 2021***

**Quraanka: -** Xil. Xaamud Cisman

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

Doodda Xeerka Ururada iyo Asxaabta Siyaasadda Maalintii 2aad

**Md. C/raxman Yuusuf Cartan:- (9min 30sec):** Bismilahi Raxmaani Ramiin. Guddoomiyaha, Xildibaanada, Shaqaalaha iyo saxaafada waxaan idinku salaamayaa. Asalaamu Calakum Warax Matulahi Wa barakaatu.

Marka ugu horaysa waa in aan u hambalyeeyaa Guddidii xeerka ka soo shaqaysay, waxaanay xeerka u galeen si waayo aragnimo badani ku jirto. Si waanaagsan ayey uga soo shaqeeyeen, waxa kale oo u hambalyeynayaa kuna raacsanahay soo jeedihimii iyo talooyinkii shalayto shalay halkan laga soo jeediyey, gaar ahaan Xildhibaan Xuseen Axmed Caydiid iyo xildhibaanadii kale ee dooday.

Markaan isku eego Guddida shaqadeedii iyo doodii shalaytoole waxa ii muuqatay inuu Goluhu noqday Gole waayo arag ah, dalka uga tago xeer aad u wanaagsan oo ku saabsan ururada iyo Asxaabta Xisbiyada. Waa in dhalinyarada hadal qoraalku tixgelin siisa waxa la soo jeediyey oo si fiican u qortaa.

Qodobo badan oo aan islaha ka hadal ayey xildhibnaadk ka hadaleen, waxaanan Golaha ku dhiirinayaa inay tix-gelin siiyaan wixii la soo jeediyey. Waxa aan ka hadlayaa oo kaliya ka aan islahaa ka hadal.

Waxa ka mid ah waxa qoran xuquuq muwaadinka iyo xuquuqda Asxaabta, Iyana waxa qoran waajibaad waa Qodobka 9aad, waxa ku qoran xuquuq muwaadinka oo loola jeedo xuquuqda dadka xisbiga ku jira, markaan **waxaan soo jeedinayaa ha lagu dara waajibaadka xubinta xisbiga inay qaadhaan bixiso, inay hawlaha xisbiga ka qayb qaadato, inay xeerka xisabka raacdo, isla markaanta ixtiraanto.**

**Qodobka 10aad** sababaha lagu waayi karo xubinada, waxaan ku dari lahaa xarafka "E" haddii ay xubuntu bixin waydo qaadhaankii ku waajibay xubinta Xisbiga ku jirta".

Waa in xubintu bixisaa qaadhaanka Xisbiga, ha noqdo bile, ha noqdo lix biloodle ama sanadba waa in masuuliyiinta xisbigu dadka ka dhigaan kuwo xisbiga wax ku leh, hana lagu dhiirigeliyo xubnaha inay qaadhaanka bixiyaan.

Qodob shalay laga qayliyey oo ku saabsanaa lacagta dawladdu bixiso oo Guddidu soo jeedisay I hanti dhawrka dawladu leedahay la galiyo, waana qodobada u dambeeya.

Guddoomiye iyo mudanayaa arrintaasi waa waxa inaga maqan waa isla xisaabtan, waana inay jiraan dadka daba socda oo xisbiyada ku dabagala qaabka ay lacagta la siiyo u isticmaalaan, isla xisaabtan ku sameeyaan. Waxaan ognahay inay lacag wanaagsan qaataan, waana muhiim in Hanti dhawruhu ogaado lacagtaas qaabka ay u istcmaalaa, Lana ogaada sida Golada aanay waxba u gaadhsiin, waxaad arkaysaa inay xisbiyadu Gobalada waxba gaadhasaaiin.

Guddida diiwaangelintu waa inay ogaataa inay xisbiyadu shaqaynayaan, dawladuna waa inay lacagtaas ku dabagashaa. Hanti dhawrku waa inuu ahaadaa kuwa lacagta baadhayaa oo saddex xisbiba baadhayaa, oo ka eegaan sida ay deegaanka uga shaqaynayaa eegaana waxyaabaha uu ka qayb qaadan karo sida caafimaadka oo aanu sixbigu noqon nin cod iyo doorasho doonaya.

Waa raacsanahay in la baadho siday lacagta u isticmaalaan xisbiyadu, isla markaana waxaan dhiiri-gelinayaa in qaadhaanka xisbiga la badiyo si xisbiga lacag wanaagsani ugu soo baxdo. Waxa kale oo aan taageersanahay dhammaan qodobadii shalay laga hadlay.

**Md Xuseen Maxamed Cige** **(9min 24sec):-** Bismilahi Raxmaani Ramiin. Guddoomiyaha sharafta leh, Xildibaanada sharafta leh, Shaqaalaha iyo saxaafada waxaan idinku salaamayaa Asalaamu Calakum Warax Matulahi Wa barakaatu.

Wixii aanu ka hadli lahayn waa laga hadlay, waxaan raacsanahay Qodobadii shalay iyo maanta laga hadlay, laakiin wixii qodobo kale ah ee aan is leeyahay waxbaad ku kordhin kartaa.

Qodobka magacaabida Guddida ururrada iyo Asxaabta Xisbiyadda waxay ka imanayaan Laba xubnood waxa soo xulaya Madaxweynaha, Laba Xubnood shir-guddoonka, laba xubnood bulshada rayidka ah oo midkood dumar tahay, hal xubin oo ay soo xuleen ururka qareenada.

Waxaan halkaa ka arkaa waxoogaa caddaalad darro ha, haddii aan xisaabiye ka ahay oo aan xaday oo haddane la yidhaa baadh haddana waa anigii xaday. Waxaan odhan lahaa labadaas ha laga daayo Shir-guddoonka oo ha loo qaybiyo labada xisbi mucaarida.

**Ruqsadda xisbiyada.**Waxa igu cuslaatay oo halkan ka muuqda doorashada ururrada ama xisbiyadda oo ah Xisbiyada ay dhammaatay ruqsadda la siiyey ma gali karaan Doorasho Wakiilo iyo deegaanka ilaa inta la qabanayo doorashao toosa ah, waxaanay ahaanayaa ku meel-gaadh.

Doorashada la qabanayo 2022 iyo wakhtiga ay dhacayaan Xisbiyadu waxa soo horaynaysa doorashada oo kol haddii doorashadu soo horaynayso maxaa keenayaa waxa dhacayaa. Markaa waxa halkaas la is waydiinayaa maxaa halkaas ku jira. Markaan waxaan leeyahay haddii aanu wakhti ka dhammaan xisbiyada waa in la qabtaa doorashada. Inagu waxayu fadhinay 15 sanno dadkuna waxay leeyihiin iyaga ayaa iska

kordhista, markaa waxa jira qodob ah haddii masiibo dabiici ahi dhacdo waxa loo kordhinayaa cidda kolkaas joogta.

Deebaajiga laga dhigo ururrada ama xisbiyada waxay ahayd 150,000,000 SL.SH waxaana laga dhigay 300,000,000 SL.SH. Waxaana la yaab ah hal mar in la kordhiyey lacagtaas boqolkiiba boqol. Dadkii waxay maqleen inaga oo leh waxaanu ugu talo galnay in aanu urur ama xisbi aanu meesha soo hawaysan, taasina waxay u eegtahay in dab loo dhigayo kuwa badan oo wanaagsan dalka hogaamin lahaa.

**Waxaan soo jeedinayaa in haddii la kordhinayo lacagtaas laga dhigo 200,000,000 SL.SH ama sideedii hore loo daayo oo ahayd 150,000,000 SL.SH.**

**Md. Maxamed Cali Xirsi** **(11min 22sec):-** Bismilahi Raxmaani Ramiin. Guddoomiye iyo Xildibaano waad mahadsan tihiin.

Anigu wax badan odhan maayo waxaan jeclaa lahaa muhiimada xeerkani Qaranka u leeyahay in aan sheego. Guddoomiye xeerkani waa xeer runtii muhiim ah. Aniga oo cidna u jeedin cidna ka jeedin anigu waxaan qabaa inuu yahay xeerkani aynu Golaha kaga tagno.

Waxa dhacaya Liisamadii, mar haddi liisankii dhacayo waa muhiim wakhtigaa uu ka dhacayo ku dhicin. Hore waxa u dhici jiray dal-daloolooyin farabadan xaga doorashooyinka sida xildhibaano badani sheegeen oo Golaheena ka mid ah, Golaha Deegaankaa ka mid ah oo Madaxtooyadaa ka mid ah.

Waigay may dhinin inay xisbiyadun iska yimaadaan, laakiin mar haddii xeerkii meesha ka baxay, mar haddii Golihii deegaankii lagu soo dooran jiray meesha ka baxay, wakhtiga ay ka dhammaanaysaa ay tahay November. Mar haddii ay isku beegmayaan wakhti ay ka dhamaanayso ama wakhti doorasho waa in aynu xal helaan muhiimaduna waa taas. Waxay u fadhinaa inaynu xeerka waxna ka saarno waxna ku darno waanan ku amaanayaa Guddida mar haddii ay ka ilaalinayaa in gaabkaasi meesha ka soo baxo.

Waxa kaliya oo ay beddeleen halkii Golaha deegaanka ayey toos ka dhigeen, oo ah in toos xisbiyada loo doorto. Wakhtiga ay ku dhacayso iyo siday u dhacayso waa wax iska caadiya, laakiin lix bilood horteed sida uu sheegay Xildhibaan Xuseen Axmed Caydiid. Diyaarinta doorasho in la bilaabo ay socoto waa mihiim, laakiin inagu odhan mayno aynu bishaa ku dhex ciyaarno. Maxaa dhacayaa haddii doorashadu dhici waydo liisamaduna dhacaan, **waxaan soo jeedinayaa in xeerka sidaas lagu ansixiyo.**

Haddii aanu qodobo kale ka hadlo sida Guddida loo dooranayo ha laga saaro labadaas xubnood ee Golaha soo xulayo, waayo Goluhu waa xisbiyo oo haddii la yidhaa Shir-guddoonku ha xulo waa caddaalad darro, markaa taas ha loo daayo Golaha Guurtida.

Waxa kale oo aan leeyahay dhaarta ha loo daayo dhaarta Koomiishanka doorashooyinka oo kale waayo labada koomiishan waxbay wadaagi karaan. Labada Guddidu shaqooda way isku jiraan markaa sidaas ha loo daayo.

Waxaan odhan lahaa Guddidan la qayb qabinayo ha laga daayo ururrada qareenada waxa jira laba ama saddex oo waliba is haysta markaa Guddida ha loo daayo inuu Madaxweynuu wada magacaabo, isaga oo raacayo shuruudaha xulashada xubnaha ee aqoon leh, ee waayo aragnimo leh.

Waxaan soo jeedinayaa in wakhtiga Guddida Xulista ururrada iyo asxaabta laga daayo 5 sanno oo wakhtigeedu ku eekadaa oo kaliya lix bilood oo wakhtga kala xulista ururrada iyo Asxaabta.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa waa in xeerka laga daayaa in lagu xaddido ama lagu sheego qaab dhismeedka Xisbiyada ama Ururrada wwaayo Xisbi ama Urur kastaa waxa uu leeyahay xeer-hoosaad,laakiin waxa jira xeerar ay wadaagaan saddex xisbi qaran oo waajibaad iyo shuruudo gaar ah faraya.

Sidoo kale waa in xisbiyadu aanay ku xad-gudbin xeerka oo lagu maxkamadayn karro, xaga lacagta ee ah 300,000,000 SL.SH markaa ka hadli maynee waxaan ka hadlaynaa urur, markaan waxaan leeyahay waa in lacagtaas la liban laabaan oo lacagtaas laga qaaday waa in doorashada lagu galaa.

Waxaan leeyahay marka qofku kaligii lacagta bixiyo wax kasta isagaa bixinaaya iska yeelanaya, markaa isagaa Xisbigii ama Ururkii iska yeelanaya. Waxaan soo jeedinayaa halka lacagta ee ah 300,000,000 in laga dhigo 600,000,000 waana in aanu qof kaliya bixine ay koox ahaan isku bixiyaan oo xisbigii ama ururkii la wadda yeesho, inaga oo og dhibaatada in qof jaliya wax  bixiyo ay xisbiyadii ku keentay.

**Waxaan soo jeedinayaa** *waa in aynu soo saarnaa xeer sheegaya in aan doorasho dib u dhac dambe ku iman, waxaan soo jeedinayaa in xeerkan la ansixiyo, waxaanan leeyahay waxa xeerkani inoo noqon doonaa xeer aynu kaga tagno Golaha oo taariikhda inoo gala*.

**Md. C/qaadir X. Ismaaciil Jirde:-** Gudoomiye iyo Xildhibaanada Sharafta leh dhamaantiin waan idin salaamayaa, Warqada u dambeysa ee Gudiddu soo gudbisay waxa ku lifaaqan magacyada Xubnaha Gudidda, waxa kale inagu cusub garyaqaanadii la soo taliyayna inay soo saxeexeen oo ku soo dareen magacyadoodii iyo saxeexyadoodii, anigoon Xildhibaanada Gudidda ku jira ee saaxiibadey ah aan waxba ka sheegayna hadana is-raacsanaantooda saluug baa iga galay, oo inta in ka salbalaadhan bay ahayd dad xisbi ka soo wada jeeda oo hoos u haasaaway weeye, anigu qonntooda, garashadood iyo raganimadooda waxba ka sheegi maayo, laakiin waxa lagu wada niyad samaan lahaa hadii axsaabto dhami ka wada muuqdaan.

Tan kale, mar hadii garyaqaanadii magacyadoodii keeneen dee talada golaha ayay siiyeen, taliyayaasha sharcigu golehey u shaqeeyaan, Shir-gudoonkana uma shaqeeyaan, Gudina uma shaqeeyaan, mar hadii taladoo keeneen waxay ahayd in taladoodii halkan lagu soo lifaaqo oo la keeno, waana sida habooneyd ee talada shir-gudoonku ma lahe golaha oo dhan baa leh in la keeno ayay ahayd, taasina inay sune inoo noqoto wixii maanta ka dambeeya ee Ilaah inagu simo oo sida u shaqeyno.

Sidii rag horeba uga hadlay Xeerkani wuxuu tilmaamayaa Qaab-dhismeedka Xisbiyada, xisbi waliba ruqsad buu haysta, qaab-dhismeed buu leeyahay shir-weyne lagu ansixiyay, gole dhexe lagu ansixiyay, Gudidda waxa la gudboonayd intaanay ka hadlin qaab-dhismeedka xisbiga inay soo qaataan nuqul Xeerarka xisbiyada oo ay ka heli karaan Gudidaas aynu maanta toos-toosinayno, qaab-dhismeedka xisbigu waa kaas oo gole iyo shirweyne lagu ansixiyay, dadka ansixiyayna waa afar laab ama shan laab golaha dad ka badan.

Wuxuu u qoran yahay, Hay'adda ugu sareysa waa Shir-weynaha, Golaha dhexe, hogaanka xisbiga, garabka haweenka, garabka dhalinyarada, gudidda gobolada, gudidda degmooyinka, tuulooyinka iyo laamaha xaafadaha iyo laamaha dibada. Intaas waxaad moodaa in xeerarkani inuu xaaraantimeynayo intaasba, oo si dadban uu wax uga badalayo xeerkii axsaabta oo uu tilmaamyo gudiddu intaasuu noqonayaa, waxa weeyena inta kale sharci maaha, taasina xisbiga ma qabato, wax ka badal xeerka xisbiga cid ku sameyn karta ma jirto xisbigaa iska leh.

Gudidda waxa loo sameeyay maaha inay xeerka wax ka badasho, mabda'a loo sameeyay waa inay ku ilaaliso axsaabta in hawshooda daah-furnaan iyo dimuqraadiyad ku saleysan yihiin oo dastuurku tilmaamayo, wixii inta ka sokeeya waa farsamao, waxa lagu ilaalinayo waa daah-furnaan, dimuqraadiyad iyo wada-tashi oo aanu noqon mid nin la wareego oo nin toocsi ah oo aan xubnaha lagu gafin, marka xeerarkani wuxuu xaaraan timaynayaa qaab-dhismeedkii shir-weynaha xisbiga lagu ansixiyay oo uu in badan leeyahay waa xaaraan, taasna xisbiga xaq looguma laha loomana dejin karo, iyaga looma dirsan.

Tani waa fatwo, wuxuu leeyahay*, Xubin waxa loola jeedaa xubin ka mid ah hogaanka xisbiga, gudidda fulinta iyo golaha dhexe,* salkana wuxuu xisbigu ku hayaa waa shirweynaha iyo taageerayaasha waana laga tagayba oo lama soo qaadin.

Waxa kale oo la yidhi *hogaanka xisbiga waxa loola jeedaa Gudoomiyaha, gudoomiye ku-xigeenka iyo xoghayaha guud ee xisbiga*, ragii kale mee? Inta kale ma rooti baa? Yaa awood u siiyay inay xisbiga hogaankiisa cayimaan? Xisbiyada xaq looguma laha, mabda'a lagu ilaalinayaana daah-furnaan, dimuqraadiyad iyo wada-tashi, xaga dambe waxa lagu qoray qodob kaas sii ta'kiidinaya oo ah *xisbina sooma gudbin karo qaab-dhismeed ka duwan kaas la soo sheegay,* waa la xaaraantimeeyay, lamana xaaraantimeyn karo, marka waxaan

qabaa qodobkaasi waa gaf, waana wax ka badal xeerkii lagu sameeyay oo daaqada ka soo galay ee aan albaabka ka soo galin.

Marka anigu waxaan qabaa Qodobkaas meesha laga saaro, hogaanka xisbiga hadii la soo qaadanayo waa kan halkaas ugu qoran ee shir-weynuhu ansixiyay ee Gudidda Diiwaangalinta Axsaabtu abashay ee haysato oo ka marakacday, kaasay gudiddu aqbashay oo ku shaqeysaa waxay ahayd in kaas gudiddu aqbashay in la soo dheegto, laakiin in halkan lagu abuuro maaha, waana gaf axsaabta iyo dimuqraadiyada loo gaystay, midhkaas waxaanu soo jeedinaynaa in la saxo oo aan Xeerkaas lagu ansixin ilaa gafkaas dastuuriga ah ee ku jira laga saaro.

Tan kale, Xildhibaanadii iga horeeyay baan la qabaa, Gudiddani way shaqeynaysay waana jirtaa, laakiin waa fadhiid, xataa waajibkoodii way gudan karri waayeen maalintii dhoweyd ee shirka golaha dhexe ee xisbiga aanu lahayn warqad official ah baa loo geeyay qof kamuu iman waana xil-gudasho la'aan, waa nimankii ka markhaati kici lahaa go'aamadaa la gaadhay inay saxyihiin.

Shirkaas saddex shay baa lagu ansixiyay, xisbigu wuxuu leeyahay miisaaniyad iyo xisaab xidh oo shirka golaha dhexe la soo jeediyaa Xildhibaan Xasan Xuseen baana soo jeediya, odoroska Miisaaniyada iyo xisaab xidhka intii hore cod baa lagu meel mariyay, inay qaataan oo ku dhaqaan xisbiga oo yidhaahdaan taasaana idinku dabagalaynaa weeye, kamana ay soo xaadirin, musharixiinta cod baa lagu ansixiyo lagu meel mariyay, waxyaabaha xisbigu ansixiyo nuqul baa loo diraa oo la siiyaa, nuqulkaas iyo xeerkaas bay qaataan oo xisbiyada ku dabagalaan, dee halkan lagama hago siday xisbiyada u dabagalayaan.

Waxa kale oo jirta, Gudiddii waa la badalay oo waa la dhalan rogay, waxani waa axsaab, saddexda xisbi baana loo garsoorayaa, ama ha ka wada maqnaadaan meesha ama ha kuwada jiraan, gari Alley taqaanaaye, Madaxweynuhu laba shaadh buu huwan yahay, waa gudoomiye xisbi marka arrinta xisbiyada laga hadlayo oo isaga iyo Faysal Cali Waraabe iyo C/raxman waa isku mid waana isku maamuus, wuxuu dheeryahay kursiga Madaxweynaha, maalinta uu isagu kala qaado oo uu Gudoomiyaha Xisbiga wareejiyo ha soo magacaabo gudoomiyaha xisbigu markaa, mabda'una waa saddex xisbi oo loo garsoorayo, marka saddexdiiba waa inay ka wada maqnaadaan ama kuma wada jiraan baan soo jeedinayaa.

Labada xubnood ee Shir-gudoonku soo xulayo, shir-gudoonku waa odeygii golaha wakiilada ee awood gaar ah oo ka baxsan golaha malaha, goluhu ku matalaa markay qaybaha dawlada timaado, goluhu ku matalaa marka wafti lala kulmayo, goluhu ku matalaa wax kasta, goluhuna waa golihii oo sida rag hore uga hadleen laba isku heli maayo inaad ansixiye noqoto iyo inaad soo xule noqoto, ama ansixintii inaga qaada oo guurtida geeya ama ansixintii aynu ku ekaano, labadaasna waa in Golaha laga qaado.

Hal xubin, baa la yidhi ururka qareenada, had iyo jeer waxa lagu soo qoraa xubnaha la soo xulayo waa inuu ku jiraa xubin garyaqaana oo xubin garyaqaana ay ku jirto ciddii doonta ha soo xushee, marka waxaan qabaa anigu iyagu yaanay isasoo xulin, iyagu position dawli ah maaha, sharcigoodiina maba hayno, marka yaanay iyagu isa soo xuline waa in xubnaha la soo xulayo shardi laga dhigaa in xubin sharci-yaqaan ahi ku jirto.

Waxa kale oo aan sheegayaa in la simo axsaabta, mar hadii la yidhi Madaxweynihii baa magacaabaya dee Madaxeynuhu waa xisbi, labadii xisbi ee kale la qadiyo maaha, waa in Madaxweynaha la siiyo xubin isagoo xaga hoose kaga lifaaqan tahay inuu gudoomiye xisbi yahay, labada xisbina midkiiba xubin la siiyo ayaan soo jeedinayaa.

Waxaan isna ka hadlayaa arrin sharbi baa jirta oo ah qaynuunku dib uma noqdo, wuxuu ka bilaabmayaa maalinta uu dhaqangalo ee Madaxweynuhu saxeexo 21 cisho gudohood xeerka faafinta rasmiga lagu soo saaro, halkan **Qodobka 12aad Farqadiisa 1aad** oo sheegaysa *in aanu qofna isu sharaxi karin xisbi laba jeer wax ka badan*, maalintuu dhaqangalo xeerku bayna ka bilaabmaysaa ee wixii ka horeeyay, **Farqadiisa 2aad** ee isla qodobkaasi waxay leedahay *qofna ma qaban gudoomiye laba jeer wax ka badan mudaddii xisbigu jirey,* UCID waxay jirtay ilaa 2003dii, ma taasaa loo celinayaa oo lala doonanayaa, ninbaa marka la raadsanayaa, ha xumaado ha samaado, muwaadinka in xeerka gudihiisa lagu gafo maaha, tani nin baa la target-gareynayaa, Xeerkana waxa laga bilaabayaa maalinta uu ansaxo, Madaxweynuhuna 21 gudohood ku saxeexo ee lagu soo saaro faafinta rasmiga ah, 2003dii xeerkani kuma noqon karo loomana celin karo hadaan nin loo dan lahayn.

Baadhista, Xisbigu wuu is-baadhaa waana la baadhi karaa, dantaana ku jirta, waxaynu nidhi xisbina urur shisheeye ama dawlad shisheeye lacag kamma soo qaadan karo, sida kaliya ee lagu ogaan karaana waa baadhis, halkan waxa kaliya oo baadhistii lagu koobay qaadhaanka xukuumadu siiso axsaabta, taasi waa sharci waana daw, xisaab xidhna waa la celiyaa, waana la cayimay wax loo isticmaali karo, in kasto ay ka fiinayd in inta laga badiyo, baahiduna intaa way ka badan tahay oo baahiyo badan baa soo bixi kara, in xisbiga gacanta laga xidho waa yar qalooc, waxa kaliya oo ka reeban inuu kaambeyn Xisbi ku galo lacagtaas, laakiin hawl kale xisbigu wuu leeyahay oo koraya, marka waxaan soo jeedinayaa taasna in sidaa laga badalo oo lagu daro in baahiyihii kale ee loo arko inay daruuri yihiin ee aan lagu soo koobin kirada iyo hawlaha xafiiska.

Xeerkan gabigiisaba mabda'a keenay waxa weeye 10kii sannadood ayaa dhamaanayaa, tobankaas sanno siday ku yimaadeena waynu ogayn, arrintuna halkaas kamma bilaabantee waxay ka bilaabantay markaynu axsaabtii saddex xisbi ku soo koobnay, halka dawada u baahani waa halkaa, tani waa stop gap, xalkii uun baynu dib u dhigaynaa, dalka saddex xisbi ma anfacdo kuwan jooga iyo kuwa iman doonaba, hadii aynu wax xalinayno waxay aheyd xal inta ka duwan bay u baahnayd, waxay ahayd inaynu gudi heer qaran ah abaabulno oo nidhaahno maxaynu ka yeelnaa arrintaas tirade,

inama anfacdo waan qirayaa xisbi baana madaxdii ka ahayo waan qirayaa, dimuqraadiyada meelna kagama jirto saddex xisb baa jiraya in la yidhaahdo, laakiinse inadhahaynu is-qabano dan baa inagu kaliftay oo waan ku soo caano maalnay, laakiin ilaa aamanuuda inaan sii wadno maaha, saddexda iman doonan sidaasuun baa looga caban doonaa, qofkii aan labadaas midna ku jirin gacmuhuu ka xidhan yahay, marka waa in qaabkii xisbiyada loo kordhin lahaa laga hadlaa, cilmi-baadhis bayna u baahan tahay, talloyin baa jira ismaynaana waydiin, in Golahani agaasimay ahayd intaynu xeerkan de-dejinayno, waxay ahayd inaynu wax ka badalno umada inaga dambeysa wax uga tagno.

Gudoomiye, hadaad tidhaahdo Ramadaan baa la shaqeynayaana cid kaa yeelaysaa ma jirto, marka inagoo 7maalmood inoo hadhay hawl aynaan dhamayn karayn oo inagoon guurtidaba gaadhsiin baa la xidhayaa, markaa inaynu xeer guurtidii aan gaadhin oo Madaxweynaha aan gaadhin ka tagno maaha, Gole cusub baa imanaya, anigu waxaan qabaa in arrinta Golaha cusub loo daayo oo aan laga sii baaq-baaqin, tan kale ee aan qabaa waxa weeye mar hadaynaan inagu dhamayn karayn oo hadii guurtidu wax ka soo badasho aynaan dhamayn karayn, oo hadii Madaxweynuhu soo celiyo aynaan eegi karayn waa bil saddexe bil saddex laguma guuro, wakhti ina cidhiidhinayaan ma jiro oo waxa ururada u hadhay sanad iyo sideed bilood waa December 2022ga, falaadh inagu taagan oo la leeyahay kama fadhiisan kartaana ma jirto.

Waxa leeyahay, waxa la doonayaa in Doorashada Madaxweynaha dib loo dhigo, hadii dib loo dhigona labada xisbi way ka dhamaanaysaa, waxaana loo dan leeyahay oo ay noqonaysaa in xisbiyadani ka qayb-galin doorashada Madaxtooyada, Xisbiyada intay ka dhamaaneyso ilaaDecember 2022ga waa Axsaab qaran lamana odhan karo axsaab ku meel-gaadh ah, lixda bilood ee ka horeysana waxaa la sii bilaabayaa abaabulkii iyagana hawl u taala maaha, marka si axsaabta wakhtigooda loo soo gaabin karo ma jirto, daaqad ha laga soo galo ama meel ha looga soo dhacee ma jirto si loo soo gaabiyo wakhtigooda, lamana yarayn karo.

Gudoomiye, Goleynu nahay, yaan la isku ceebsanin saraaxada, cidna maan caayin ra'yigaygaan dhiibay ee yaan la isku ceebsanin, waxa la soo jeedinayona yaan laga furaysanin dhagaha sidii qaalibka ahayd ee lagu soo daro talada. WSC.

**Md. Cali Maxamed Aadan:-** ASC, anigu ma badinayo, Xeerka Qodobadiisa qodob-qodob u akhrin maayo, waxaynu ka hadlaynaa Xeerka Axsaabta Xeer Lr. 14, Xeerkani hore ayuu u jabay haday tahay xaga xisbiyada iyo haday tahay xaga xukuumadaba, xilkii waaxda fulintu wuu jabay, xisbiyadana wuu ka jabay, ciddi ma xaalayn, sidii in loogu dhaqmo ay ahayd oo la isku ilaaliyo waxay ahayd in 5tii sano ee hore golayaashii deegaanka la soo doorto, 5ta ku xigtana ururadii la furo oo 10kii sanno kaga eegtahay xisbiyada, Golayaashii deegaanku markii wakhtigii ka dhamaaday cid u kordhisay oo u

ogolaatay inay hantidii umada sii maamushona ma jirto, wali way joogaan oo way maamulayaan hantidii umada, waa dambi laga galay xeerka iyo dastuur jabin laga galay dastuurkii.

Anigu waxaan qabaa intaynu iyadoo wakhtigiiba inaga dhamaaday oo 5 cisho oo Ramadaan ka hadhsan inoo hadhay, Ramadaan mrkay dhamaatona doorashadii baa dhacayso Gole cusub baa imanaya, wakhtiga inoo hadhay waxay ahayd inaynu dambiga dhacay ka hadalno, dambi baa dhacay dhowr jeer baa rag ka hadleen, bustaaba la saaray, walina dambigii wuu socdaa, hantidii umaday maamulayaan, haday dib u sharaxan yihiin, horuu Xeerkani u jabaye in taas laga hadlay ahayd maanta.

Inaynu maanta Xeerkan wax ka badal iyo kaabis ha lagu sameeyo ka hadalno gabi ahaanba ma waafaqsani, anigu sidaa C/qaadir Jirde soo jeediyay baan kuwada raacsanahay, waliba in waxaan caqliga galin oo ka sii daran oo dambi ah in lagu soo qoro khalad wayn baan u arkaa, carabtu waxay tidhaahdaa kan tagayow ceebta ha badsan, Gudoomiye yaynaan ceebta badsan, Xeerkan halka ha lagu joojiyo yaan laga hadlin, Golaha cusub siday doonaan ha isla yeelaan, qaanuuniyan baa la isugu jabay, dambiyo dhacay, inaynu ka hadalno waa xaaraan baan qabaa, WSC.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise:-** Bismilaahi, Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Shaqaalaha dhamaan ASC, mudane Gudoomiye, dee horta golihii wali wuu shaqeynayaa anigu ma garanayo waxaynu Ramadaanta u shaqeyn kari waayay, waynu shaqayn karnaa, mudo xileedkiina muu dhamaan wali gudoomiye, marka waxaan leeyahay, maadaama mudo xileedkeenii aanu dhamaan xaq waxaynu u leenahay xeerarka wixii inoo hadhay inaynu dhameyno, kan aynu ka hadlaynaana wuxu ka mid yahay xeerarka aynu ka hadlayno, ra’yiga xildhibaanadu wuu kala duwanaan karaaye laakiin xeerku waa mid loo baahan yahay, gal-dalooliyinka oo dhan ma daboolaye wax badan buu daboolayaa.

Horta qodobka lacagta ka hadlaya, waxaan taageersanahay sidii hore in loo daayo oo 150 miilyan ha loo daayo.

Xisbiga marka wakhtigu ka dhamaado waa in xal loo helaa, sida inaga guurtidu inoogu kordhiso markay inaga dhamaato, sida Gudidda ayaan ku taageersanahay qodobkaas, xisbiyaduna way siman yihiin oo kulmiye gaar noqon maayo waana isku xuquuq.

Hogaankana, si guud uun baa loo tilmaamyaaye waa lagu sixi karaa wixii ka dhiman, sida C/qaadir sheegayna waa sax eh ha laga dhigo.

Anigu waxaan leeyahay, Xeerkan waynu u baahanahay, wuxuu saxayaa waxyaabihii inaga khaldamay, sida C/qaadir sheegay xisbiyadii way koobanyihiin, waxay ahayd in lagu daro Murashax madax-banaan mar hadii dastuurkii ka hor imanayo in la badiyo,

soo jeedinta Gudidda waan taageersanahay, meelihii aan ka sax-saxayna xoghayntaan u gudbinayaa. WSC.

**Md. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte)** (17min 32sec)**:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiye waad mahadsantahay, waan Salaamayaa mudanayaasha iyo Martida joogta Golaha waan soo koobayaa Gudoomiye, munane Gudoomiye marka hore waynu wada aqoonsanahay in dimuquraadiyadeena wax-badani ka qaldanyihiin oo ay saani u talaabsan la'dahay, sababaha ugu waaweyna waxa weeyi Intitution-kii dimuquraadiyada oo xisbiyada ah oo ah Xibiyo dad samaystay canaan gaar ahna ma lahan. Hadii aad aragto Institution aan si wanaagsan u shaqaynayna waxaa u sabab ah waa xeer xun.

Xeerka aynu haysanaa kuma fila in uu xeerarkeena hago oo uu dimuquraadiyada ku hago, waayo maanta waxaynu joognaa Dini kali ah oo layidhaa Global village oo sida taayirada baabuurtu isku galaan ayay xeerarka duniduna maanta isku galaan oo maanta hadii aad eegto laba wadan xeerarkooda xisbiyadu waa kuwo is wada gala, sidaa taayirada oo kale oo xeerarku Standard ayay leeyihiin.

Markaa xeerkeenani Standard uu la haystaa majiro, mana fulin karo dimuquraadiyadii uu Dastuurku inoo Qeexay ama inoo cadeeyay, waayo practical waynu u aragnay marka xeerarka kale aad barbar dhigtana waad arkaysaa. Wuu u baahnaa ku noqosho wuu u baahnaa daraasad intaa ka badan, wuu u baahnaa arimaha Xisbiyada ee Dastuurka ku qoran in Talo qaran laga yeesho.

Saddexda Xisbi waxay xadidayaan mabdi'ii Dimuquraadiyadda, waxa uu xadidayaa sida farqada ka horaysaa qodobkaa sheegayso ee nidaamka Xisbiyada baddan, waxay ka hor imanaysaa oo ay xadidaysaa Xuquudii muwaadiniinta. Iyada oo qaabkan aynu u dhignayna uu lidi ku yahay xisbinimada, sababta oo ay xibiyadu waxay kaga duwan yihiin Ururada waa joogto (permanence). Xisbigu hadii aanu joogta ahayn oo la leeyahay 10-kii sanaba marbaa la baabiinayaa oo qaar kale ayaa imanaya dee Xisbi noqon maayo waayo xibiyadu 100 sano ayay jiraan. Inta xisbi ee samaysmaya xeer ma sameeyo ee waxaa sameeya shicibka oo mabda wata.

Xeerku sidiisaba waxaa loo baahanyahay in uu ka hadlo Mabaadii Guud ee Dimuquraadiyada, Daah-furnaanta, Xuquuqda muwaadiniinta iyo Asluubta kale ee anshaxa, nabad-galyada iyo Qaranimada leh in lagu ilaaliyo ayaa loo baahan yahay, wixii intaa ka hooseeya Ururka ayaa Xaq u leh oo xisbiyada Xeerarkoodu

way kala duwanaan karanaan, mana aha in ay isku mid ahaadaan, mana aha in hoos loo galo oo layidhaa Guddidaasi inta iyo intaa ayay noqonaysaa mid Baarlamaanka u Taalana maaha.

Xeerkani waxa uu u baahan yahay in ay Dawladu ku ilaaliso in ay xisbiyadu ku dhaqmaan xaqiijinayana cadaalada, Xuquuqda Muwaadiniinta, sinaanta Xubnaha xisbiga, Dimuquraadiyada Xisbiga gudihiisa, waa mabaadiidaas waxa looga baahan yahay in uu xeerkani si qoto dheer uga hadlo oo aanay xisbiyadu ka bixin. Xisbiyadu company maaha sidii uu Xildhibaan Cabdiqaadir Sheegayay ee waa Urur distoorku uu fasaxay xeerkuna wuu Regulate-garaynayaa kaliya.

Waxaad arkaysaa in xeerka lagu leeyay intaas oo milyan hala bixiyo waa mid xaaraan ah ayaan qabaa anigu, waayo aduunyadu bari hore ayay ka gudubtay xuquuq muwaadin oo lagu xidho lacag, xibiyada waxaa lagu xidhaa in aanu xag-jir ahay in aanu cunsuriyada ahayn, in aanu sinaanta dadka Duulaan ku ahayn, mabaadii Guud ayaa lagu xidhaa Ururka.

Sida aynu xeerka ku ansixinay in Xidhibaanka lacago laga qaada waa qayru Dastuuri waana mid aynaan ugu talo galin in ninka xidhibaanka ahi uu umada u shaqeeyo marka meel walba lacag lagaga qaado. Waxaanan qabaa in aynu ka leexanay mabaadiidii Dastuuriga ahay ee aynu ku soo noqono ayaan odhan lahaa.

Mudadii ururada waxaa ka hadhay in Door ah, ee waxan mudada aynu ugu qornay waa wax la yidhaa Iskaa-yeel (Arbitrary). Waayo maxay mudadu 20sano u noqon wayday? Maxay 5sano u noqon weyday? Maxay 10sano u noqotay? Waad mid aynaan ka jawaabi karrin, waana waxyaabaha ka mamnuuca in xeeka lagu saleeyo, anigu waxaan qabaa in ay 5sano noqoto ama waa in ay Abadan noqotaa, sida uu ku noqoqonayo mid Abadan ah waa in laga badiyaa xisbiyada oo aynu ka badninaa Saddexdan xisbi ee jira.

Waana farqad ka hor imanaysa xuquuqdii muwaadiniinta ee waa in baadhis intan ka badan lagu sameeyaa oo si uun loo furdaamiyaa ayaan qabaa loona yeedhaa dad intan ka balaadhan oo leh, culimo, agoonyahay, indheer garad oo xal inoo keena, waa hadii aynan Distoorka Furi karayn oo aynaan waxa-ka- beddeli karayn.

Waxaanan qaybaa 5tii sanaba marbaa doorasho la galaaye waa in ay xisbiyadu shanta fagax galaan oo dadkuna sidaa xoriyadooda ku helaan ama xisbiyada so baxaa sidooda ha iska ahaadeen oo waligoodba ha jireen iyada oo taasina ay cabudhinayso dareenkii dadka, waayo Saddexda xisbi cida aan ku kalsooni qabini

meel allaale meel uu qabtaa ma jirtee waa in uu Xamar qabtaa ama meel kale u tahriibaa.

Waxaa kale oo aan qabaa in komishanka doorashooyinku uu maamulo komishan ururda, waayo uma baahnin institution dheeraad ah oo hawlihiisa wata oo kharashaad dheeraad ahi inagaga baxo, oo wax allaale wax ay inoo soo kordhinayaan aanay jirin xilkaa loo magacaabay in aynu sii haysano uma baahnin ayaan qabaa.

Hadiise laga maarmi waayo oo la yidhaa sidaa ayay ahaanayaa, waxaan qabaa in ay noqdaan Guddi madaxbanaan guud ahaan, waayo hadii aan maanta ku difaaco wax xibigayga dan u ah bari waxaa iman kara mid aan xisbigayga ahayn oo aniga ayay iga hor imanaysaa, sidaa awgeed anigu waxaan rabaa wax Cadaalada ah oo xibiyada u wada Siman. Sidoo kale Guddidaasi uma baahna in ay xeerkan ku jiraan ee waxay u baahan yihiin in xeer gaar ah loo sameeyo oo nidaamkiisa iyo habraacyadiisu ay u dhan yihiin.

Sidoo kale gudidaas hadii maalinba ninka madaxweynaha ahi uu raad ku yeesho waxaan qabaa in aanay wexeenu aanay hana qaad noqonayn, waxaa haboon in guddidaa aanu Madaxweynana soo magacaabin, Gudoomiye shir-gudoonku maaha institution gaar ah ee waxa uu ka mid yahay Golahan, ee hadii golahani habraac loo soo xusho uu samaynayo.

Mudane Gudoomiye hadii aynu u baahanahay in xeerkan wax laga beddelo waa in aynu wax wanaagsan ka beddelaa, waxaayo waxaan arkaa soo-jeedinta guddida Xeerka oo awalba liitay, conflicts badan ku jireen in ay qaar kale ku sii kordhinayaan ayaan qabaa, ***waxaa kale oo aan qabaa in ay soo-jeedinta Guddidu aanay gabi ahaanba aanay shaqaynayn oo aanay ahayn mid sax.***

***Waxaan soo-jeedinayaa baahi hadeer inagu de-dejisaa ma jirto maadaamo oo ay sanad iyo sideed bilood ka hadheen, waxaanan qabaa in Golaha wakiilada ee soosocda oo dar-dartiisa qaba in aynu u dayno, oo xisbiyadan hada joogaana sidooda ha ku galeen, waayo xisbiyo xusubi ma gali karaan doorasho madaxtooyo ee xisbiyada soo jirayna mudadoodu ha dhamaato, kadib ha laga tashado ayaan soo jeedinayaa Asc.***

**Md. Faarax Maxamuud Cabdille** **(8min 04sec):- Asc, Wrm, Wbr,** Mudane Gudoomiye ugu horayn waxaan raacsanahay Guddidii Xeerkan ka soo shaqaysay waana Xeer aad iyo aad u wanaagsan, aniga oo xildhibaanada ka hadlay fikirkooda ku ixtiraamaya anigu waxaan qabaa in xeerkani uu yahay xeer aad u

mihiim ah, waxaanan soo jeedinayaa in la ansixiyo, aniga oo ka hadli doona qodobo yar-yar oo aan eeg-eegay, iyada oo ay ka mid yihiin Qodobada aan ka hadlayo;

Magaca Xeerka halka ay ku qorantahay wax-ka-beddel ***waxaan soo jeedinayaa in laga saaro oo magaca xeerka sidii sii hore loo daayo.*** Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa halka ay ku qorantahay ***Guddida kala saarista Ururada waxaan soo jeedinayaa in sidii hore ee xeerka loo daayo oo ahayd in Madaxweynuhu uu magacaabo Golaha Wakiiladuna ay ansixiyaan.***

Qodobka ay xildhibaanada badan koodu ka hadleen ee ah ***Ruqsada Xisbiyada*** waxaan qabaa hadii aanay ruqsada ka qaadi karrin ama shahaadada loogu aqoonsaday xisibi shaqadooda ugu weyni maxay noqonaysaa, saw uma muuqato in aanay waxba qaban karrin? ***Waxaan qabaa in ay ka qaadi karaan, hadii ay xukunkaa ku qanci waayaan oo ay wax ka tirsadaan, markaa ayay Maxkamadda Sare Rafcaan u qoranayaan, waxaan soo jeedinayaa in sidaa loo qoro Qodobkaa.***

Qodobka sheegayaa dhaarta sheegay; Somaliland wexeeda waayeelka ah ama Siyaadaha ku jira ee Guddida gali kara, waxaan qabaa in uu dhif yahay ama aan la helaynba, sidaa awgeed waxaan qabaa in sidan dhaarta loo dhigo (***MAANTA LAGA BILAABO WAXA IGU WALAAHIYA, BILAAHIYA, INAANAN KA MID AHAYN XISBI/URUR DHEXNA U NOQONAYO URURDA IYO ASXAABTA INTA AAN XILKAA HAYO).***

Waxaa kale oo aan soo-jeedinayaa mudane Gudoomiye; Halka sheegaysa banaanaanshaha Xubinta Guddida waxaan soo-jeedinayaa in farqadaha uu ka kooban yahay qodobkaasi lagu daro farqad cusub oo noqonaysa 4aad una dhigan sidan; ***Marka xilkii ay haysay uu ka dhamaado.***

***Waxa kale oo aan soo jeedinayaa mudane Gudoomiye in Goluhu uu shaqeeyo Ramadaanta inta kal-fadhigan inooga hadhay maadaamo oo uu yahay kal-fadhigii ugu danbeeyay waayo hawlo badan ayaa inoo yaala.***

Waxaa kale oo aad looga hadlay oo aan aad ugu taageersanahay qodobadaa ay guddidii xeerkan loo saaray ay wax ka soo beddeleen, sababta aan ugu raacsanahayna waxaa weeyi, sida aynu ka wasa war qabno Asxaabteenii iyo Ururadeenii waxay isku beddaleen qabyaalad, markaa qodobo badan oo lagu xadidi karo ayaa ku jira, kaw taas waan ku taageerayaa, sidoo kale waxaan soo dhaafay oo aan **soo-jeedinayaa lacagta ay xildhibaano badani soo jeediyeen in la dhimo waxaan soo jeedinayaa in la kordhiyo lagana dhigo hal bilyan (1,000,000,000 Bilyan oo Somaliland shilin ah).** Sababta oo ah waa tukaano,

sawkuwa iyaguba lacaga qaada maaha ee musharixiinta ka qaadaya, sidaa awgeed waa in iyagana Qaranka lacagi ka soo gashaa Asc.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** **(8min 36sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiyaha Golaha, Xildhibaanada, xog-hayaga Guud iyo Xog-haymaha kale, Saxaafada iyo dadweynahaba waan salaamayaa Asc, Wrm, Wbr, Ugu horayn baahida loo qabo in xeerkan wax-laga beddelaa ma jirto, Sababuhuna waxay yihiin waad aragtaan halka ay marayaan xisbiyadeenii hadii ay noqonto gudahoodii, Dimuquraadiyadoodii, qaabka ay wax u xulanayaan, qaabka ay u shaqaynayaan, sidaa awgeed maalin looga baahi badan yahay in wax-ka-beddel lagu sameeyo Xeerkan ma jirto.

Hadii aan gudo galo Xeerka gaar ahaan Ujeedooyinka waxaan soo-jeedinayku darayaa Saddex Farqadood isaga oo ahaa markii hore 3farqadood oo kala ah;

1. ***In la helo hanonaan laga illaalinayo in xisbi ama Urur ay gudihiisa ka dhacdo in sifo garbo-duub ah shakhsi/shakhsiyaad ama koox u maamulato hawlaha Ururka ama Xisbiga, Saddexda Xisbi iyo Ururada Samaysmaya in lagaga ilaaliyo in aanay kooxaysi gudohooda ka dhicin.***
2. ***In laga hor-tago in uu samaysmo nidaam ku lid ah hannaanka dimuquraadiyada iyo is doorashada.***
3. ***In lagu ilaaliyo xuquuqda Doorashada iyo samaysashada Ururada ee Dastuurku jideeyay.***

Mudane Gudoomiye iyo mudanayaalba saddexdaa Farqadood ayaan soo jeedinayaa in lagu daro u jeedooyinka Xeerka, sidoo kale waxaan Iyana taabtay Laba meelood oo kala xeerka gudihiisa, meelahaas oo kala aha Qodobka Magacaabida Xubnaha Guddida, ***waxaan ku raacsanahay xildhibaan Faarax in xubnaha Guddida loo daayo magacaabidooda Madaxweynaha,*** halka xeerka aynu ku qayb-qaybinay.

***Qodobka kale ee aan taabtay waa Mudada Xil haynta Guddida***; Guddidan waxaa loo baahan yahay mudo kooban oo ah mudada Ururada la kala saarayo markaa halkaa ***waxaan soo jeedinayaa in laga dhigi Mudda xil hayntoodu in ay ku e'kaato lixbilood (6) kadib maalinta la soo saaro natiijada doorashada Ururada.***

Waayo wax ay toban sanadood (10) iyaga oo aan hawl hayn ay halkaa kharash la fadhiyaan oo ay hawl inagu soo kordhiso anigu ma qabo, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in lixdaa bilood la siiyo kadibna la kala diro.

Qodobka iigu danbeeyaa waxa weeyaan ka ku saabsan Xuquuqda muwaadinka ee ah **Qodobka 9aad Farqadiisa 4aad** waxa uu u qoran yahay sidan; **Xubin kasta oo doonaysa in ay ka baxdo xil xisbi ama urur;**

b. **Waa in xubinta xisbiga/ururku u soo gudbisaa arjiga is casilaadda.**

Xarafkaasi waa iska caadi oo waxa uu sheegayaa is casilaada, laakiin mida dhooqada ku jirtaa waa Xarafkan ku xiga oo u dhigan sidan;

t. **Waa in xisbiga /Ururku ku aqbalaa ama ku diidaa 14 maalmood gudahood is casilaadda xubinta.**

In uu ku aqbalay iyada waxba kamma qabo, laakiin wuu ku diiday, xisbi anaan isku aragti ahayn ama aan diiday ayaan idhi waan is casilay, xagee laga keenay aqliga ah in la igu diidi karo oo la yidhaa nagama tadi kartid? Meeshu ma jeelba? Xisbigu jeed maaha xuquuqda qofka lagu lumiyo, qofku isagaa xor u ah ra'yigiisa meesha uu la tagayo ***waxaanan soo jeedinayaa in kalmada ah ama ku diidaa ah in laga saaro, oo laga dhigo waa in uu ku aqbalo muddo 14-cisho gudahood ah.***

Gudoomiye iyo mudanayaalba aniga oo u mahadsanaqaya Guddii ka soo shaqaysay Xeerkan, ***waxaan soo jeedinayaa qodobadaa aan soo jeediyay iyo wax-ka-beddelka guddida marka lagu darro in si deg-deg ah loo ansixiyo xeerkan, waayo waa xeer aad iyo aad loogu baahanyahay*** wabilaahi tawl-fiiq.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf** **(5min 45sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Gudoomiye waan soo koobayaa ugu horayn waxaan ku taageerayaa ragbadan oo iga horeeyay hawshii ay soo qabteen, ragas oo ay ka mid yihiin Xildhibaan Xuseen Axmed Caydiid, xildhibaan Aw-Xoog, Xassan Xuseen iyo ragbadan oo kale ayaan ku taageerayaa soo-jeedimihii ay sameeyeen, hadii aan dhawr jeer dulmaray ama aan akhriyay xeerkan wax-beddalaad layidhaa waxba uma soo kordhin xeerkan ***waxaana qabaa in gabi ahaanba dib loo celiyo sidii uu Xildhibaan Cali-barre sheegay in gabi ahaanba did loo celyo ayaan soo-jeedinayaa oo sidiisii hore xeerka loogu dhaqmo.***

Waxaa kale oo qabaa sida xidhibaano badani ka hadleen saddexda xisbi oo sanad iyo sideed bilood u hadhay oo madaxweynaha la dhacaya ama bil ay u dhaxayso in ay noqonayaa asxaab ku meel gaadh ah, waan ka soo horjeedaa taas, ***waxaanan soo-jeedinayaa bil ayaa u dhexaysa madaxweynaha iyo Asxaabta, Golaha Guurtiduna waa ta wax inoo kordhisa waxna inga dhinta ee waxaan leeyahay waa in ay ama Madaxweynaha bil u kordhisaa ama Ururda bil ka soo dhintaa***

***oo ha sinto oo saddexda Xisbi ee maanta jogaa ha ka qayb galaan Tar-tanka Madaxweynaha.***

Asxaabta qaranka ee hada jirta hadii ay noqoto Kulmiye. Waddani iyo Ucid way u madabanaan yihiin in ay qaynuunkooda samaystaan oo aan la faragalin wax alle iyo wax uu tarayaa ma jirto.

Waxa kale oo aan halkan ku arkayay xoolaha yare e 14-kunka ah miyaa? Garanmaayo, ayaa hanti dhawre ka daba tagayaa waa baadil weeyaan, ninka hanti-dhawraha ahi waxa uu u xilsaaranyahay 235milyan ee Dollar ee lixda Gobolada dalka ku baxaya ee Miisaaniyada layidhaa in uu kor-joogteeyo ayuu u xil-saaranyahay, ***sidaa awgeed waxaa soo jeedinayaa in taa laga daayo waayo waa meel ka dhac.***

Xisbigu hadii uu meel ka dhac ku sameeyo Distooska ama Diinta islaamka Xaqiisa marin mayso wax aan Maxkamad ahayni, isaga oo is difaacaya Maxkamaduna danbigiisa caydaynayso iyada oo ruqsada kala noqonaysa ama xidhaysa, ***sidaa awgeed waxaa leeyahay Gudi waxaa ka wanaagsan in xagaa Maxkamada la geeyo, waana in uu maamulkiisa Xisbigu u madaxbanaanaadaa.***

***Ugu danbayn waxaa soo jeedinayaa in Xeerkaa Sidiisii hore loo daayo, Saddexda Xisbina sidoodii ahaadaan oo laga daayo ururadan la leeyay waa la furayaa wsc.***

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(3min 55sec):-** Gudoomiyaha, Xildhibaanada, Kaaliyayaasha iyo saxaafada Asc. Gudoomiye anigu ma badinayo mawduuc kaliya ayaan ka hadlayaa, waxay xildhibaano ka hadleen meesha waynu ka tagaynaa ee aynu wax ka tagno, sidaa awgeed Xeerkan markii aan eegay dhawr meelood oo ku jiray soo jeedintaydii Xeerkii Guud ee Doorashada oo aan la qaadan markii xataa Taageero helay, ayaan soo celinayaa, waxaa halkan ka muuqda oo aan inta badan ku dadaalayay in la hello mar hadii asxaabtii la kordhin waayay Musharax madaxbanaan oo uu kani mamnuucay ee waxaan leeyahay kaa ha latuuro.

Waxaa kale oo jirta waxaa la leeyahay waxaa jirta xuquuq muwaadin, waxaan leeyahay taasina maaha mid jirta, miyaanay murashixiini xidh-xidhnayn? Xisbigii keeni lahaana yaa ka qaaday taladii? Waxaa ka qaaday nidaamka ah ninka musharaxa ah waa caaqilkiisa ama suldaankiisu uu keeno, taas oo ah mid dib inoo celisay waxa kaliya ee lagu badbaadayaana waa in taa la waayo, oo qabyaaladana la tuuro.

Waxaa kale oo aan doonayaa in aan digniin siiyo, digniintaas oo ah waxaa jira musharixiin soo galay xisbiyadooda oo doonaya marka ay ku soo baxaan doorashooyinka in ka baxaan xisbigaa ay ka soo bexeen kuna biiraan xisbi kale, sidaa Awgeed ***waxaan soo jeedinayaa in ninku xisbigii uu kaga soo baxay doorashada hadii uu ka baxo waan in din loo soo doortaa oo deegaankiisii laga qabtaa doorasho lagu soo dooranaya musharaxaa, waana in aanay cidi ka dhaxlin.***

**Md. Ibraahim Mahdi Buubaa** **(7min 43sec):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaashuba way Salaamanyihiin, Marka hore waxaa muhiim ah marka aynu Xeer samaynayno kan ina horyaala ama mid kalaba ha ahaadee waa in ujeedad xeerka loo samaynayaa aya ahaataa ujeedo balaadhan oo umada anfacaysa waa in ay noqotaa. Laakiin hadii xeerkaasi ku salaysan yahay ujeedo gaar ah ama arimo markaas taagan noqon maayo xeer mudo dheer jira dadkana anfaca.

Marka aynu ka hadlayno xeerkan waa in uu noqdaa mid ka hadlaya nidaamka dimuquraadiyadeed ee wadanka ka jira hir-galinaaya waa in uu ahaado oo dhamaystiran oo aan meelna qabyo ku lahayn.

Ugu horayn waxaan soo jeedinayaa lacagtaa Ururada Is diwaangalinaya laga qaadoyo ***waxaan soo jeedinatyaa in lacagtaa laga dhigay 300 ee Milyan loo daayo sideedii hore ee ahay 150milan, oo culays intaa ka badan aan la saarin.***

**Qodobka 12aad Mudadda Musharraxa Madexweynaha, Ku-xigeenk Madaxweynaha iyo Gudoomiyaha Xisbiga**

1. **Qofna iskuma sharrxi karo Musharrax Madaxweyne, Ku-xigeen Madaxweyne laba jeer wax ka badan.**
2. **Qofna ma qaban karo Xilka Gudoomiyaha Xisbiga laba jeer wax ka badan, mudadii uu Xisbigaasi Jiray.**

Halkaa waxaan qabaa in uu ku jiro god-doloolo ama uu yimaad muran siyaasadeed oo la yidhaa xeerkani maalinta uu soo baxay ayaa laga bilaabayaa dabaqaadiisa oo sida ay garyaqaanada qaarkood ku doodaan Xeerku Dib uma noqdo, anigu waxaan qabaa in ay arinkaasi qalad yahay halkana waa in lagu cadeeyaa oo aanay noqon wax-mad-madaw leh.

Tusaale hadii aan soo qaato hadii Xeer la soo saaro odhanaya Tukaamada Somaliland ku yaala in loo sameeyo meelaha ay ka fuulaan dadka curyaamiinta ah ee baaskiiladaha wataa, micneheedu maaha kuwa hada jira ayaa loo samaynayaaye kuwii horana wey saamaynaysaa, markaa halkaasi waxay u

baahantahay in la cadeeyo oo xisbiyadani intii ay jireen hadii uu Madaxweyne yahay iyo hadii uu Gudoomiye yahayba ay saamayso oo ay noqoto wax lagu dabaqayo Xeerkani ee aanu noqon mid u danaynaya qofkii xisbiga ka ahaa gudoomyhu uu mar kale iyo mar kale isku soo sharixi karo, markaa ***waxaan soo jeedinayaa in halkaa la cadeeyo, oo la yidhaa waa in xeerka lagu dabaqaa xisbiyadi jiray min bilaw ilaa dhamaad ama maalintii la aas-aasay ilaa maalintan maanta ah.***

Waxaa kale oo aan ku dari lahaa laba qodob oo gaa-gaaban mid waa xeerka guddidu kuma soo darin xeerkana kuma jiri jirin, qodobkaas oo ah Musharax madaxweynaha ee xisbiga u tartamayaa isaga oo shaadhkii gudoomiyaha xidhan in uu yidhaa inta uu halkan soo fadhiisto yidhaa ila tartama waa laga qurux badan yahay oo dimuquraadiyadiina way inaga burburaysaa oo dadkii kale ee xisbiga ka tartami lahaana cagta ayaa la saarayaa cid u codaynaysaana ma jirto. ***Sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in halkaa lagu soo daro Musharax ka Tartamayo xisbiga gudihiisa madaxweyne iyo ku xigeen in xilka Gudoomiye nimo uu ka tago lixbilood ka hor maalinta la qabanayo shirweynaha xisbiga ee lagu dooranayo musharax Madaxweynaha iyo kuxigeenka Madaxweynaha.***

***Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa aannan ku adkayn lahaa marka musharaxa la xulayo waan lixda gobol ee dalka doorasho ay ka qabtaan sida aduunyada kale isticmaasho oo tartan furan lagu kala saaraan taageerayaasha xisbiga, wax garadka xisbiga iyo kaadiriintiisuba si uu soo boxo qof ay ku kalsoon yihiin xisbiga iyo taageerayaashiisuba.***

Waxaanan leeyahy halaga dooyo cabudhinta xisbiyada dhexdooda ka jirata, waxaanan qabaa in hadii xeerka inahaa lagu daro waxaa laga maarmi lahaa sidii mudanihii iga horeeyay uu sheegayay ee uu lahaa musharax Madaxnanaan ayaa loo bahan yahay, waxaana meesha ka soo bixi lahaa taageerayaal xisbi oo isku duuban xeerkuna jideeyay sidii ay u soo saari lahaayeen Musharaxa Madaxweyne iyo Ku xigeenkiisa waxaanan qabaa in ay sidaa ku hirgalayso Dimuquraadiyayda aynu doono in aynu dadka ka hirgalino.

Midna ha la ogaado dimuquraadiyadaasi dadka ka hir gali weydo hooyada dhashaa waa xisbiyadee oo ay ka timaadaa hirgalinteeduye hadii uu xeerku ku qasbi waayo sida ay doonaan ayay u dhigayaan, oo waxaa laga yaabaa in la yidhaa arimahaasi waa arimihii xisbiga gudihiisa e ama uu xeer hoosaadkiisa ku samaysan lahaa, weyna fiicnaan lahay hadii ay ku samaysanayaan, iyada oo ay muuqato in xisbiyadii ay noqdeen shaadh qof leeyahay.

Lagacagaha xisbiyada la bixiyo halkan way ku cadahay hadana lama dabaqo oo maynaan arag iyada ooh anti-dhare galayo ama la xisaabinayo, ee hal qof ayaa wax bixiya oo siduu doonaba ha ku bixiyee isaga ayaa yeelanaya meeshii, markaa waxaan leeyahay Guddidaasi waa in ay noqotaa mudada ay xisbiyadu jirayaan oo iyagu daba galaan ayaan loo baahanyahay waad mahadsantihiin Asc.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| -------------------------------------------------- | ------------------------------------------ |